Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qorolaaka kal.6-aad
Documentiga Kal.6-aad/kul.19-aad **06/07/2015**

Kalfadhiga 6-aad
Kulankiisa 19-aad Saac.Fur. 12:15gh-Saac, Xir.07:57gd.
Guntinta (Qourum) Xildh. 158
Ajendaha

1. **Furitaanka Aayadaha Qu'aanka kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **U codeynta Xubnaha Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka iyo Xuduudaha iyo Federaalka .**
4. **Qaybinta Sharciga ka hortaga been xalaalaynta Lacagaha iyo Maalin gelinta Argagixisada**
5. **Qaybinta Xisaab-xirka sannadka 2014ka.**
6. **|Qeybinta Hindise sharciyeedka Hay'adda dib u soo celinta Qaxaootiga**

1). Shiguddoomiye Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaar).

Waxaa Shirka furay Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari), waxaana lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka, uuna akhriyay Xildhibaan Ibraahim Dhayfalah.

2). Guddoomiyaha wuxuu sheegay kal.6-aad kul.19-aad ,Qourumkana uu yahay 158 Xildhibaan in uu furanyahay

3). Kadib ,Guddoomiyaha wuxuu akhriyey Ajendaha Farq. 3-aad,4-aad iyo 5-aad ,wuxuuna xildhibaanadda weydiiyey in ay sidaas u qaataan iyo inkale.

Xildh. Fadhaye(point of order) ,wuxuu weydiiyey Ajnedaha Farq. 6-aad ,waxa loola jeedo Hay'adda,in ay tahay mid hadda la sameynaayo ama ay tahay Hay'ad horey u jirtey.

4). Guddoomiyaha wuxuu sheegay ansixinta labada Guddiga ee Madaxa-banaan in loogu codeyndoono sida tan :-

- In xildhibaan walba loo yeerayo magaciisa

- Waxaa la siinayaa 2-warqadood
- Warqadaha waxaa ku qoaran 2-santuuq
- Mid waxaa ku qoran Haa
- Midka kalena waxaa ku qoran Maya
- Kadib, wuxuu ku kala ridayaa Labada Santuuq ee Dhalada ah Mid waxaa ku qoran Guddiga Madaxa Banaan ee doorashooyinka midda kalana waxaa ku qoran Guddiga Madaxa banan Xuduudaha iyo Federaalka..

5). Guddoomiyaha wuxuu kaloo sheegay in guddi walba uu ka kooban yahay 9 Xubnood ,Xildh. Ayuu sheegay in uu weydiiyey Aqlabiyaddu **,Aqlabiyaddu waxaa la helikaraa inta Codeysey +1 . inta joogta waa 187 Xildhibaan barka wuxuu noqonayaa 94.**

6). Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyey in la bilaabayo Codeynta .

Xildh. Cabdi Xaashi(point of order**)**wuxuu soo jeediyey in Guddiyadda la siiyo 2 – daqiiqo ay ku soo jeediyaan Bareerahooda.

Xildh.Khadiijo Maxamed Diiriye(Point of order) waxay sheegtey in ay sakangareysey Xildhibaankii iyada ka horeyey Xildh. Cabdi Xaashi ,taasina ay ku qorantahay sharciga waxayna soo jeedisey Guddiyadda in lawada diido ama in loo wada codeeyo.

Xildh. Shariif Maxamed Cabdalla(Point of order). Wuxuu soo jeediyey santuuqa in istilaab la saaro ama Sax la saaro ,calaamadaha kala duwan waxay keeni kartaa dhibaato.

7)-Guddoomiye ku-xigeenka 2-aad |Mudane Mahad Cabdalla Cawad,wuxuu sheegay in Xildhibaanada ay yaqaaniin sida loo codeeyo,waa inaan la calaamadeynin labada meelood hal mar.waxaad qoreysaa Haa ama Maya.

8) Guddoomiyaha Mudane Jawaari,wuxuu sheegay in ay bilaabaneyso Codeyntii Xubnaha Guddiga Madaxa-banaan Doorashooyinka iyo Xuduudaha iyo Federaalka. Waxayna u dhacdey sida tan:-

Guddoomiyaha wuxuu xildhibaanada weydiiyey haddii ay jiraan cid aan loo wicin , waxaana loo gudbey Codeyntii. Wuxuu kaloo sheegay in Xildhibaano qaar ay Guddoonka ka codsadeyn in ay tirinta ka qeyb galaan qaar ka tirsan Xildhibaanadda, si shaki uu halkaa ugu baxo Guddoonka wuxuu magacaabey 5 –Xubnood uu ka kid yahay:-

1.- Xildh. Maxamed Cabdi
2.- Xildh. Cabdi Xaashi
3.- Xildh. C/llaahi Cabdi Garuun
4.- Xildh. Maryan Aweys
5.- Xildh. Aamina Maxamed

Kadib, Waxaa Bilaabatey Codeyntii Guddiga Madaxa-Banaan ee Doorashooyinka Natiijadana waxay noqotey sida tan ee Shaxda hoos ku qoaran:-

Lam	Magaca	Oggol	Diiday	Ka Aamustey
1	Siciid Xaashi Warsame	124	42	17
2	Maxamed Xasan Taani	120	48	16
3	Xuseen Cabdi Aadan	115	55	14
4	Sayid |Cali Sh. Maxamed	129	42	17
5	Maxamed Axmed Nuur	117	49	18
6	C/raxmaan Cusmaan Dirir	128	41	14
7	Maxamed Daahir Maxamuud	122	49	18
8	Xaliimo Ismaaciil Ibraahim	103	68	13
9	Khadiijo Cosoble Cali	119	56	8

Guddoommiyaha wuxuu sheegay in 9-xubnood ee Guddiga Madaxa –banaan ee Doorashooyinks ay wada Guuleysteyn.

Kadib,Waxaa bilaabatey Codeyntii Guddiga Madaxa-Banaan ee Xuduudaha iyo Federaalka Natiijadana waxay noqotey sida tan ee shaxda hoos ku qoran:-

Lam	Magaca	Oggol	Diidey	Ka Aamusey	Ciladoobay	Tootaalka
1	Abuukar Sh. Cabdi Ibraahin	144	32	9	2	187
2	C/khaaliq C/llaahi Xamsa	145	33	7	2	187
3	C/llaahi Gacal Cabdi	138	36	11	2	187
4	Khaliif C/kariim Maxamed	141	33	11	2	187
5	Liibaan Cali Sahal	137	35	13	2	187
6	Maxamed Muxyadiin Sh. Mursal	141	33	10	3	187
7	Muuse Waxgarad C/llaahi	137	35	13	2	187
8	Saciido Xasan Cusmaan	139	34	10	4	187
9	Xuseen Xaashi Xasan	141	33	11	2	187

Kalfadhiga 6-aad Kulankiisa 19-aad uu shir-guddoominaayey Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari),wuxuu sheegay in ay wada guuleysteyn Guddiga Madaxa Banaan ee Xuduudaha iyo Federaalka,saana uu ansax ku yahay labada cod ee la qaadey , wuxuuna sheegay in shirka uu xiranyahay saacadu markey aheyd 07:57gd